## WAXBARASHADA DIYAARINTA EE AASAASIGA AH

# KU SOO DHAWOOW ISKUULKA!

Ilmahaagu waxa uu iskuul ka bilaabi doonaa Tampere ee waxbarashada diyaarinta ee aasaasiga ah. **Ujeedada waxbarashada diyaarinta ah waa in ardaygu barto luqadda Finnish-ka, la fahansiiyo iskuulka Finnish-ka iyo la horumariyo xirfadaha waxbarashada.**

Iskuullada waxbarashada diyaarinta ah ee Tampere waa:

- **AHVENISJÄRVI, Korkeakoulunkatu 6, TAU, Konetalo, dabaqa 3.-4.** (fasallada 1.-3. iyo 7.-9.)
- **ETELÄ-HERVANTA, Mekaniikanpolku 9** (fasallada 1.-9.)
- **HATANPÄÄ, Haapakuja 2** (fasallada 1.-6.) iyo **Koivistontie 31** (fasallada 7.-9.)
- **JUHANNUSKYLÄ, Postikatu 2** (fasallada 1.-6.) iyo **Rautatienkatu 3-5** (fasallada 7.-9.)
- **LIELAHTI, Lielahdenkatu 15** (fasallada 1.-9.)
- **PELTOLAMMI, Säästäjänkatu 16** (fasallada 1.-6.)
- **SAMPO, Pellervon koulutalo, Sämpsykkä 1** (fasallada 1.-3.) iyo **SAMPO, Sairaalankatu 6** (fasallada 1.-6.) iyo **SAMPO, Kaupinkatu 29** (fasallada 7.-9.)
- **TESOMA, Kohmankaari 11** (fasallada 1.-9.) iyo **Kalkun koulutalo**, **Kalkunkatu 34** (fasallada 1.-3.)
- **VUORES, Rautiolanrinne 2** (fasallada 1.-6. iyo 7.-9.)
- **WIVI LÖNN, Hämeenpuisto 34** (fasallada 7.-9.)

**Diiwaangelinta waxbarashada diyaarinta waxay ka dhacaysaa bogga waxbarashada diyaarinta:**

www.tampere.fi > ereyada: *valmistava opetus* tai *Preparatory instruction*.

Waxbarashada diyaarinta ah marka lagu daro luqadda Finnish-ka, waxaa lagu bartaa maadooyin kale oo isugu jira xisaab, maadada bey'adda (biyolooji iyo juquraafiga), taariikhda, muusiga, isboortiga, farsamada gacanta, farshaxanka muuqaalka iyo ingiriisiga (laga bilaabo fasalka 3aad). Maadada diinta lama qaato xilliga waxbarashada diyaarinta ah. Marka ay aqoonta luqaddu korodho, ardaydu waxay sidoo kale ka qayb qaadan karaan casharrada fasallada kale. Ardaydu waxay casharro qaadanayaan qiyaastii 24 ilaa 30 saacadood toddobaadkii taasoo ku xidhan sanadka.

Casharrada waxaa loo qaadan doonaa koox-koox yaryar, inta badana toban arday ka badneyn. Arday kasta waxaa la siinayaa **barnaamij waxbarasho u gaar ah** taas oo loo diri doono iskuulka ardayga ee ku xiga. Waxbarashadu waa bilaash. Ardaygu wuxuu iskuulka ka helaa cunto bisil iyo waliba buugaag iyo buugga wax lagu qorto. Ardaygu wuxuu heli doonaa kaadhka baska bilaashka ah ee safarada iskuulka haddii safarka iskuulka uu dheeryahay. Degmadu waxay kaloo

abaabushaa daryeelka caafimaadka iskuulka (kaalkaaliyaha caafimaadka, dhakhtarka iskuulka, dhakhtarka ilkaha).

Waxbarashada diyaarinta ahi waxay caadi ahaan socotaa hal sano, markaas ka dib ardaygu wuxuu u wareegaa iskuulka ku yaal aaggiisa. Waxbarashada diyaarinta ahi waxa ay qiimaysaa aqoonta iyo darajada waxbarashada uu ardaygu u gudbayo. Haddii loo baahdo waxaa laga yaabaa inay macno samaynayso in iskuulka sannad dib loo soo celiyo si loo helo wakhti ku filan oo lagu kobciyo aqoonta luqadda ee looga baahan yahay waxbarashada. Aqoonta ku hadalka luqadda ee ilmaha ayaa si degdeg ah u koraya, laakiin waxay qaadataa dhowr sano in aqoonta luqadda ee loo baahan yahay in la barto. Isticmaalka iyo fahamka wanaagsan ee qoraalka iyo erayada Finnish-ka, iyo sidoo kale barashada qorista wanaagsan waxay qaadan kartaa shan ilaa toddoba sano. Sidaa darteed ardaygu wuxuu u baahan yahay taageero iyo barasho luqadda Finnish-ka ah marka laga eego dhinaca ardayga ee luqad kale ku hadla, sidoo kale markuu baranayo waxbarashada aasaasiga ah. Waxbarashadan waxaa loo yaqaannaa **maaddada luqadda Finnish-ka oo ah luqad labaad (S2)**. Maaddada S2 ka sokoow, ardaygu wuxuu heli karaa caawinaad taageere ah oo maadooyin kala duwan haddii loo baahdo.

***Barashada afka hooyo*** aad ayey muhiim ugu tahay Finland. Waxay taageertaa dhammaan barashada iyo sidoo kale horumarinta luqadda Finnish-ka. Xitaa haddii aad ku hadasho afkaaga hooyo guriga, waxaa sidoo kale muhiim ah inaad barato wax-akhriska iyo qorista. Aqoonta badan ee luqadda waxay sidoo kale faa'iido u leedahay shaqada mustaqbalka ee nolosha.
Luqaddaada hooyo xiisaddeeda waxaa la bixiyaa laba cashar todobaadkii, waana in gruubka ku jiraan ugu yaraan lix caruur ah. Goobta wax lagu barayaa waxay noqon kartaa meel kale aan ahayn iskuulka uu ilmuhu dhigto. Haddii aad bilowdo waxbarashada, ka qaybqaadashadu waa waajib Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waxbarashada iyo diiwaangelinta: www.tampere.fi > ereyada: *oma äidinkieli* ama *Native language*.

**Macluumaad ku saabsan iskuulka Finnish-ka ah**
Waxbarashada khasabka ah ee Finland waxay socotaa ilaa da'da 18 jir. Iskuulka waxa uu bilaabmayaa sannadka uu ilmuhu todoba jirsado. Fasalada 1-6 waxay ka tirsan yihiin dugsiga hoose, fasallada 7-9 waxay ka tirsan yihiin dugsiga dhexe. Tampere dhammaan iskuullada hoose waxay bixiyaan waxbarasho isku mid ah, laakiin iskuullada qaar ayaa xooga saara ama ku barta luqadaha kala duwan. Iskuullada badankood waxaa laga maamula degmada. Iskuullada gaarka loo leeyahay way ku yar yihiin Finland. Iskuulka hoose-dhexe waa in la dhammeeyaa ka hor intaadan waxbarashadaada ku gudbin. Iskuulka hoose-dhexe kadib ku dhawaad kala badh ardaydu waxay aadaan dugsiga sare iyo badhna kalena dugsiyada farsamada gacanta. Gelitaanka dugsiyadani waxay ku xidhan tahay celceliska shahaadada fasalka sagaalaad ee iskuulka dhexe.

**Wadashaqeynta iskuulka iyo guriga:**
Iskuulka wuxuu aaminsan yahay wada shaqaynta waalidka iyo macalimiinta in ay tahay muhiim. Macallinku waxa uu waalidka u qabanayaa **ballan qiimayn ah** oo ay kaga wada hadlayaan horumarka ardayga uu ka gaadhay waxbarashada. Iskuulku waxa kale oo uu qabanqaabiyaa **kulano barbaarineed** (fiidka waalidnimada) halkaas oo arrimaha guud ee iskuulka lagaga hadlo iyo halka ay waalidiintu kula kulmi karaan macallinka. Haddii waalidku ay su'aalo ka qabaan arrimaha iskuulka, waxaad aadi kartaa iskuulka oo aad la kulmi kartaa macallinka ama maamulaha oo aad ballan ka qabsato. Iskuullada waxay isticmaalaan **nidaamka macluumaadka ardayda ee Wilma**, kaas oo ay waalidiintu ka helaan macluumaadka ku saabsan waxbarashada ardayga. Macallinku wuxuu Wilma waalidiinta ugu diri karaa fariimo ku saabsan, tusaale ahaan, munaasabadaha kala duwan, xafladaha iyo dalxiiska gaaban ee ka dhaca iskuulka. Sidoo kale waalidiintu waxay macallinka ugu qori karaan Wilma fariimo iyo su'aalo

**Dadka muhiimka ah ee jooga iskuulka marka laga reebo macalinka:**

- **Maamulaha -** hogaamiyaha iskuulka iyo horjoogaha macallimiinta
- **Sooshalka iskuulka** - shaqaalaha bulshada oo ku caawiya iyo kula taliya xaaladaha dhibaatada
- **Cilmu-nafsiga iskuulka** - wuxuu ka caawiyaa ardayga waxbarashada iyo dhibaatooyinka maalinlaha ah ee kala duwan
- **Hagaha waxbarashada** - wuxuu ardayda ku hagaa waxbarashada dugsiga dhexe iyo qorsheynta waxbarashada mustaqbalka
- **Kalkaalisada iskuulka** - kalkaalisada iskuulka oo uu ardaygu u tagi karo haddii ay dhacdo xanuun ama shil. **Kalkaalisada iskuulka waxay baadhis caafimaad ku samaysaa ardayda cusub ee Tampere.** Kaadhka tallaalka waa in loo keenaa kalkaalisada iskuulka wakhtiga baaritaanka caafimaadka.